

Caafimaadka & Daawada Taliska Goobta



Isu Qorshaynta Fataha Dooxada Webiga Cagaaran Qodobada Diyaargarowga shahsiga ah ee Caafimaadka Guriga iyo Bukaanka guriga jiifa

Injineerada Ciidamada Mareykanka ayaa uga digay gobolka in biyo-xidheenka Howard Hanson leeyahay mushkilad adkaysiga dhismihiisa ah oo xadidaya mugga biyaha lagu kaydin karo sannadkan, iyo laga yaabee sannado badan oo kale.

Qaybo ka mid ah magaaloooyinka **Auburn, Kent, Renton** iyo **Tukwila** waxa soo waajahaya khatar weyn oo ah in ay ku yimaadaan fatahaado burbur leh deyrtan. Goobo ka baxsan degaanka King County ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu saameeyo. Haddii roob culus oo muddo dheer da'aa uu yimaado xilliga fatahaada (oo dhici karta October ilaa March), guryo badan iyo ganacsiyo ku yaalla dooxada webiga Cagaaran oo aanay fatahaadu gaadhi jirin ayaa laga yaabaa in uu daadku gaadho ilaa 10 feet. Intas waxa dheer in biyuhu ay ku jiri doonaan dooxada ilaa inta laga saarayo, waana hawl qaadan karta ilaa 8 toddobaad.

Iyada oo ay ku xidhan tahay halkaad ka deggan tahay Dooxada Webiga Cagaaran, waxanu kugu dhiirigelinaynaa in aad u diyaargarowdo khatar weyn oo ka iman karta daadad iyo soo kabitaan muddo dheer qaata.

Dadweynaha ku nool Auburn, Kent, Renton ama Tukwila iyo goobaha ka baxsan degaanka King County waa in ay isu diyaariyaan:

- Fatahaad fudud iyo mid daran
- Korontada oo go'da
- Adeegga Bulaacadaha oo go'a
- Waddooyinka oo xidhma

Qaad Tallaabooyinkan soo socda imika si aad isugu diyaariso khatartan:

Haddii aad ku nooshahay Dooxada Webiga Cagaaran, iibso caymis fatahaad.

Waxay qaadataa 30 maalmood siyaasadaasi in ay ku dhaqan-gasho, sidaas darteed la xidhiidh wakaaladaada caymiska ama Barnaamijka Qaranka ee Caymiska Fatahaadda: www.floodsmart.gov, 1-888-379-9531. Iska hubi in siyaasadaadu ay kaa daboolayso dhibaatada ka timaada bulaacadaha.

Samayso Qorshe Guuritaan.

Waxa laga yaabaa in aad gurigaaga ku noqon kari waydo toddobaadyo ama bilo. Imika samayso qorshe ku saabsan halkaad ku noolaanayso ee aad ku heli karto daryeel. Iska hubi in dhammaan cidda daryeelka bixisa ay ogyihin faah-faahinta qorshahaaga. Haddi aad leedahay xayawaan carbis ah, ha ka tegin. U diyaari meel badbaado leh oo ay joogi karaan.

Samayso Qorshe Wada-xidhiidh

Haddii lagu daad-gureeyo, hubi in aad la xidhiidho cidda daryeelka bixisa, cidda caymiska caafimaad bixisa, iyo dadka kale ee aad ku tiirsan tahay si aad u ogeysiiso halkaad u guurtay iyo siday kuula soo xidhiidhi karaan.



Caafimaadka & Daawada

Taliska Goobta

Ka yimid bogga 1

Isu diyaari qorshe daad-gurayn.

Waxa laga yaabaa inaad haysato ogeysiis gaaban oo 8 saacadood ah in lagu daad-gureeyo. La shaqee jaarkaaga, dadkaad jeceshahay iyo cidda bixisa daryeelka si aad u hubiso inaad haysato arrimahan:

- **"Agabka-Bixitaanka" ee deg-degga ah.** (Eeg Liiska waxyaabaha aad ku ridanayso **Agabka Bixitaanka** ee deg-degga ah ➔)
- **Waxyaabaha Muhiimka ah** ee aad ku ridanayso meel habboon, oo xasiloon si aad deg-deg ama si fudud u heli karto waxa ka mid ah:
 - Moobilka iyo dabeeeyaha
 - Ilkaha samayska ah
 - Qalabka caawiya maqalka & baytaro dheeraad ah
 - Kursiga-curyaanka, usha socodka, wade ama qalabyada kale ee caawiya socodka.
 - Hawo siiye
 - Muraayadda indha iyo muraayadaha aragga oo wata wixii lagu nadiifin lahaa.
 - Baytari ama raadiyaha cimilada gacanta la wareejiyo leh ee ku shaqeeya AM ama NOAA oo lagala socon karo digniinaha deg-degga ah ee cimilada.
- **Gaadiid isku halayn leh haddii aad u baahato daad-gurayn.** La hadal dadka aad jeceshahay iyo cidda bixisa daryeelka imika si aad u diyaarsato qorshe aad si badbaado leh uga baxayso gurigaaga oo aad ku gaadhayso goob badbaado leh. Haddii aad u baahan tahay adeegga gaadiidka caafimaad ee tabobaran si laguu daad-gureeyo, waxaad hubisaa in wakaaladaada caafimaadku ay hore u ogeysiyaan Caafimaadka Bulshada – ee Degaanka Seattle iyo King.
- **Waddooyinka Daad-gureynta.** La shaqee cidda ku siinaysa gaadiidka daad-gureynta si aad u ogaato waddooyinka daad-gureynta ee aan ku xidhnayn Waddooyinka Dowladda ee 167 ama waddooyinka kale eek u yaalla Dooxada Webiga Cagaaran. Xasuusnow, waddooyinka aad sida caadiga ah aad isticmaasho waa laga yaabaa in fatahaaddu xidhay. Sidaas darteed, isdaad guree marka lagu amro si aad uga hortagto inaad xayiranto oo aad gasho xaalad khatar ah!

Isku ururso "Agabka Bixitaanka" oo aad heli karto, qaadan kartana oo ay ku jiraan waxyaabahan:

- Daawooyin
- Liiska Magacyada iyo telefoonada dadka muhiimka ah, sida cidda bixisa daryeelka, asxaabta muhiimka ah iyo xubnaha qoyska, cidda bixisa caymiska caafimaadka iyo cidda bixisa caymiska guryaha/kireeyayaasha .
- Macluumaadka caafimaadka sida nuqlada daawooyinka dhakhtar qoray, liiska xaaladaha caafimaad, iyo magaca iyo macluumaadka lagala xidhiidhayo dhakhaatiirtaada iyo ciidda daryeelak bixisa.
- Dhar aad ku beddelato
- Cunto iyo cabitaan u dhigma 3 maalmood
- Baytaryo dheeraad ah oo loo isticmaalo oksajiinta, qalabyada neefsiga, qalabka caawiya maqalka, qalabka dhegta ee maqalka, telefoonka gacanta ama qalab kale oo muhiim ah. Ogow: In aad iibsatoo baytaryada biyaha si qalabka caafimaadka ee ku shaqeeya korontadu ay u shaqeeyaan saacado dhowr ah.

Macluumaad dheeraad ah kala xidhiidh Xafiiska Magaaladaada ee Maamulka Xaaladda Deg-degga ah:

Magaalada Auburn: 253-876-1925

Magaalada Kent: 253-856-4440

Magaalada Renton: 425-430-6400

Magaalada Tukwila: 206-433-1800

Ka Baxsan Degaanka
King County: 206-296-3830